

Codsiga magangalyo doonka ee ilmaha cusub ee soo dhasha, caruurta daryeelka u baahan ee waalidka magangalyo doonka ah

Waalid ahaan waxa mas'uuliyadi kaa saaran tahay inaad ilmahaaga u sameyso codsi magangalyo doon. Waxa muhiim ah in laga fikiro in haddii xataa adiga waalid ahaan aad tahay magangalyo doon, aanay tan micnaheedu aheyn in ilmahaagu toos ugu dalbanaayo magangalyo doon.

Haddii ilmaha uu yahay mid daryeel u baahan waa inaad waalid ahaan, markaad umusho ka dib, aad isla markaaba soo gudbiyo "cadeyn rabitaan" dalab magangalo doon ah kaas oo khuseeya ilmaha. Tani way noqon kartaa mid si fudud loo seego marka uu ilmuhu yahay mid si weyn ugu baahan daryeel. Si loo dhammaystiro dalabka magangalyo doonka, waa in ilmahu laba todobaad gudahood la soo tusaa qeybta qaabilaada ee Migrationsverket. Haddii ay jiraan sababo gaar ah oo ilmaha lagu tusi karin xanuun dartiis ayaa si kale loo xallin karaa, tusaale ahaan inuu kaaliye ka socda Migrationsverket soo booqdo waaxda daryeelka.

Wixii macluumaad dheeraad ah la soo xiriir Migrationsverket.

Markaad Migrationsverket la soo xiriirayso, wac telefoonka adeega:

010-485 50 80, maalmaha shaqada kl. 9-15

Migrationsverket waxay waalidiinta ku wargalineysaa in joogista ilmaha ay qasab tahay in la sharciyeeyo oo codsi magangalyo oo la xiriirta dhalashada ilmaha la sameeyo.